

Heerka Gudida Gobolka Washington

Hordhac

Waraaqahan waxay bixinayaan guudmar heerarka caadiga ah ee **gudida samofalka, bilaa-xubinta** sida **uu dhigayo sharciga gobolka**, Sharciga Shirkada Samofalka Washington, laga bilaabo Janaayo 1, 2022. Waxaa loogu talo geley inuu bixiyo tilmaamo guud oo ku saabsan shuruudaha gudida is isku doorata. Waxa uu diirada saaraa hay'ada samofal: hay'ada samofalka ah ee u shaqeeya kaliya mid ama wax kabadan oo kamid ah ujeedooyinka samofal ee u qalma hay'ada laga dhaafto cashuurta sida ay dhigayso Qaybta 501(c)(3) ee Xeerka Dakhlaga Gudaha. Waraaqahani kama hadlayaan sharciga xubinimada hay'ada samofal ama federal (eeg [Buuga Samofalka Washington](#) wixii macluumaad dheeraad ah).

Macluumaad badan ka akhri:

Sharciga Wada Shaqaynta Hay'ada Samofal ee Washington: [Xeerka Dib u Eegista Lagu Sameeyay ee Washington \(Revised Code of Washington, RCW\) \(24.03A\)](#)

Sharaxa: [RCW 24.03A.010\(5\)&\(6\)](#)

Macluumaadkan waxaa loo bixiyay si ay u fahmaan hogaamiyayaasha hay'ada samofalku shuruudaha sharci ee muhiimka ah ee gudida hay'ada samofal. Dadka akhriyaya qaar ayay dhici kartaa inay la yaabaan shirarka qaar oo ay u arkayeen inay yihiin shuruud sharci oo laakiin ah ikhtiyaar. Gudida doonaysa inay ka qayb galayaan ikhtiraaca ama qaybinta hogaaminta si baahsan hay'adooda, waxaa dhici karta inay u wanaagsanaato inay bartaan masuuliyadaha qaar inay u igman karaan shaqaalaha ama gudiyo latalin, ama sharcigu kuma khasbo inay isticmaalaan qaab go'aan gaadhis oo gaar ah. Macluumaadka waxaa loo adeegsan karaan in lagu go'aamiyo shaqada ay tahay inay gudidu qabtaan, iyo waxa la igman karo, wadaagi karo, ama ay samayn karaan dadka kale. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ikhtiyaarada kale ee hogaanka, ka eeg [Bushqada Hogaanka Kale](#).

Afeef

Waraaqahan kaliya waxaa loogu talo geley ujeedo waxbarasho oo kaliya. Kama dhigna inay dhamaystiran tahay, oo sinaba uma aha talo ama latalin sharci, ganacsi ama xirfadle. Sidoo kale ma abuurto xidhiidh looyar iyo macmiil. Wixii talo sharci ah, fadlan la xidhiidh looyar haysta liisan.

Guud ahaan, sharciga gobolku waxa uu qeexayaa baaxada heerka gudida, iyo wixii sharciyan loo dul qaadan karo intaas gudaheeda. Hadii sharciyan wax laga aamusoo hay'ada samofalka dhaxdeeda, Sharciga Wada Shaqaynta Samofalka Washington waxa uu ka dhigaa heerka toos ah. Waraaqahani waxay isticmaalaan weedha "xubnaha gudida" iyo "maamulayaasha" oo la isku badbadalaa.

Waraaqahan waxaa la diyaariyay iyaga oo la iska kaashanayo *Communities Rise* oo waxaana taageeray *Xafiiska Gobolka Washington ee Xoghayaha Arrimaha Dibada*.



WASHINGTON
Secretary of State
Corporations & Charities Division





Board Members/ Directors

Xubnaha Gudida/Maamulayaasha

Qaybta Xeerka
Dib u Eegida
Washington (link)
[24.03A.500](#)

- Xubnaha gudida/maamulayaashu waa inay noqdaan shakhsiyaad oo khasab maaha inay noqdaan dad degan Gobolka Washington. Sharciyan waxaa lagu dari karaa shuruudo sida ay ku heshiiyaan xubnaha gudida wakhtigan.
- 501(c)(3) hay'adaha samofalka shacabku waxay leeyihiin ugu yaraan 3 xubnood oo gudi.
- Dhalinyarta ka yar 18 jirku waxay kamid noqon karaan gudida. Gudidu waxay yeelan karaan 3 xubnood oo dhalinyarta ah, ama 1/3 wadarta guud ee tirada gudida ayaa noqon kara dhalinyarto - kolba tirada yar.
- Gudida mudada ay haynayaan xilku waxaa weeye 1 sano, iyada oo sharcigu wax ka duwan dhigayo moojee. Mudada ugu badan ee gudida la doortay haynayso shaqada waxaa weeye 5 sano.
- Sharcigu malaha inta ugu badan ama tirada ugu saraysa ee mudada ay gudidu hayn karaan xilka. Sharcigu waxa uu xadidi karaa mudada.
- Xubinta gudidu waxay iska casili kartaa wakhti kasta iyada oo afka ama qoraal ahaan ugu gudbinaysa madaxwaynaha, xoghayaha ama cida kale ee uu wakiishay, sida lagu sheegey sharciga.
- Hadii mudada gudidu ay dhamaato, maamulaha ay mudadiisu dhamaatay waxa uu sii shaqaynayaa ilaa inta cida badalaysaa imanayso, iyada oo sharciga gobolku wax kale sheegayo moojee.
- Nidaamka xilka lagaga qaadayo xubinta gudida laguma darin sharcigan. Ka eeg sharciga wixii macluumaad ah ee gaar ah.

[24.03A.505\(2\)](#)

[24.03A.505\(3\)](#)

[24.03A.515\(1\)](#)

[24.03A.515\(1\)](#)

[24.03A.525\(1\)](#)

[24.03A.515\(6\)](#)

[24.03A.530](#)



Officers

Saraakiisha

- Saraakiisha waajibka ahi waxaa weeye madaxweynaha, xoghayaha, iyo khasnajiiga. Xafiiska madaxweyne ku xigeen looma baahna.
- Laba xafiis ayuu isku hayn karaan isla qof, marka laga tago xafiisyada madaxweynaha iyo xoghayaha oo ay tahay inay dad kala duwan hayaan.

[24.03A.585\(1\)](#)

[24.03A.585\(3\)](#)



Committees

Gudida

- Gudida maamulka waxaa u igman kara maamulka gudida si ay u gaadhaan go'aamada, marka laga tago, Gudida Maamulka. Waa inay jiraan ugu yaraan 2 xubnood oo gudida ah oo kaliya xubnaha gudida ayaa noqonaya xubnaha gudida codaynaysa. [24.03A.575\(1\)&\(4\)](#)
- Waxaa jira waxyaabao ayna gudida maamulku qaban karin: qaybinta loo ogol yahay, badalka sharciga ama xeerarka, gaadhida go'aanka cida lagu darayo gudida ama xubnaha gudida maamulka, ansixinta isbadalka wayn ee qaab dhismeedka hay'ada (sida isku darka, iibinta hanti badan, xaraashka, iwm.), ama isbadalka heshiisyada gudida iyada oo gudida maamulku ogolaato moojee. [24.03A.575\(5\)](#)
- Gudida latalintu cidna uma igmato shaqada gudida maamulka oo go'aan uma gaadhi karaan gudida maamulka. Waxay la taliyaan oo ay siiyaan macluumaad gudida ama waxay qabtaan shaqada ayna qabanaynin gudida maamulku, sida qaban qaabada munaasabad, shaqaalaysiinta dad wakhtigooda ku deeqa, ama samaynta qiimaynta barnaamij. Qof kasta oo bulshada ka socda ayaa xubin ka noqon kara gudida, iyada oo sharcigu uu u diidayo moojee. [24.03A.575\(7\)](#)



Decision-Making

Go'aan Gaadhida

- Hadii aanu ku jirin sharciga, gudi u badan xubnaha gudida ayaa iskugu imanaya xafiiska kahor inta aanu kulanku bilaabmin. Sharcigu waxa uu sheegi karaa shuruudaha ugu badan ee gudidan (sida tirakoobka), laakiin sharcigu ma ogolaanayo in gudidu ka yaraato $\frac{1}{3}$ tirada gudida maamulka. Gudidan waxaa looga baahan yahay go'aanka inay gaadhaan. [24.03A.565\(1\)](#)
[24.03A.565\(2\)](#)
- Sharcigu uma ogolaado gudida xubnaha inay kasoo muuqdaa proxy (in cid kale matasho). [24.03A.565\(5\)](#)
- Codayn qoraal ah oo boosta ama duwaan qoran waxa ay dhici kartaa hadii 100% ka qayb galayaashu ayna ka hor imanaynin xubnaha gudida maamulka, oo xubin kasta oo gudida maamulku ay ogolaato talaabada lagu taliyay. [24.03A.570](#)
- Gudidu waxay qaban karaan kulanka iyaga oo isticmaalaya mid ama wax ka badan xidhiidhka onleynka ah (sida Zoom ama sooftiweerada maqal iyo muuqaalka ah) taas oo dhamaan gudida maamulayaashu ay ka wada qayb galayaan kulanka. [24.03A.550](#)



Fiduciary

Masuuliyadaha Kalsoonida ama Xeerka Anshaxa

- Marka la noqdo gudida maamulka hay'ada samofal, gudida maamulka iyo saraakiishu waxaa saaran masuuliyad dhaqaalayn, u hogaansan iyo u daacad noqosho hay'ada samofalka. Maamulayaasha iyo saraakiishu waa inay u qaadaan wixii talaabo ah 1) iyada oo niyad wanaag leh (inay u qabaan waxay qabanaan si daacad ah, cadaalad ah oo sharci ah), 2) iyada oo danaynaya qofka caadiga ah sida ay ula dhaqmi lahaayeen xaalad kale qof kale iyo 3) qaabka ay uu u arko xubinta gudidu ama sarkaalku inay dan ugu jirto hay'ada samofalka ah. [24.03A.495\(1\)](#)
[24.03A.590\(1\)](#)
- Xubnaha gudida maamulka iyo saraakiishu, marka ay qaadanaan talaabo, waxay ku tiirsanaan karaan talada ama macluumaadka ay ka helaan khabiirada sida Xisaabiyaha shacabka ee shahaadada haysta (certified public accountant, CPA), looyar, shaqaalaha xirfadlaha ah ama xirfadlayaasha kale. [24.03A.495\(3\)](#)
[24.03A.590\(3\)](#)
- Saraakiisha gudida maamulka waxaa sidoo kale saaran masuuliyada inay u sheegaan cida ka saraysa ama gudida maamulka macluumaadka dhan ee la garanayo ee laga faa'idaysanayo (muhiimka ah), iyo macluumaadka ku saabsan wixii ku xad gudub ah sharciga (jabin sharci) ee masuuliyada. [24.03A.590\(2\)](#)

La Cusboonaysiiyay Julaay 7, 2022



**Nonprofit Association
of Washington**

Learn. Advocate. Collaborate.